FAAFINTA RASMIGA AH

الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 7aad — Muqdisho, 25 Maajo 1979 L. 2R5

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

FAAFINTA BIL SOO BAXA — جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar walba — RUKUNKA: Sanadka waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaye. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

KOOBNIIN

QAYBTA KOOWAAD

SHAHRCI

SHARCI L. 15 ee 15 Maajo 1979 Cafis Buuxa oo loo Fidiyay Dadka Dalka ka Baxsaday

QAYBTA LABAAD

W. M.

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 4.3.79, Lumid Buug kayd L. 7117 kuna qoran Shs. 6.155 ay leedahay Muraayad Xalane Maxamed L. 374

MAXKAMADDA GOBOLKA J/DHEXE, 20.3.79, Lumid Seddex Jeeg War. L. yihiin 696184-696196, 693456 uu leeyahay Jeeylaani Sheekh Yaasiin L. 375

Wakaaladda Madbacadda Qaranka — Muqdisho.

MAXKAMDDA GOBOLKA DEGMADA BERBERA, 14.3.79 lumid Buug kayd L. 2484/7 ku qoran Shs. 10.078/= uu leeyahay Axmed Muuse Faarax L. 376

MAXKAMADDA GOBOLKA DEGMADA BERBERA, 14.3.79 lumid Jeeg War. L. 100047 ku qoran Sh So. 50.000/= uu leeyahay Maxamed Cumar Cali L. 377

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 23.4.79, Lumid Jeeg War. 151835 ku qoran Shs. 25.000 uu leeyahay Cumar Sheekh Axmed L. 378

MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA, 28.3.79, Lumid 2ba Jeeg War. lr. 151602 iyo 151603 uu leeyahay Cali Ducaale Faarax L. 379

QAYBTA KOWAAD

SHARCI L. 15 ee 15 Maajo 79, Cafis Buuxa oo loo Fidiyay Dadka ka Baxsaday Dalka Soomaaliyeed

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY : Xaanshida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY : Sharciyada lamb. 17, 18 iyo 19 ee 1 Luulyo 1976 kuna saabsan Xukunka Dalka oo maamulkiisa lagu soo wareejiyay Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed;

ISAGOO AQOONSADAY : In loo baahan yahay in Cafis buuxa loo fidiyo dadka Soomaalida ah oo jooga dalal shisheeye kana baxsaday Dalka sabab siyaasi ha noqoto ama mid sharciyada Dalka aan waafaqsaneyn oo doonaayaan inay ikhtiyaarkooda ku soo noqdaan Dalkooda;

ISAGOO TIXGELIYAY : Go'aankii Guddiga Siyaasadda iyo kaa Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Qof kasta oo Soomaali ah oo dal shisheeye jooga taariikhda uu dhaqan galay sharcigan, kana baxsaday Dalka Soomaaliyeed sabab siyaasi ha noqoto ama mid sharciyada Dalka aan waafagsanayn (eed ha loo haysto ama dembi haka galo) waxaa loo fidiyay CAFIS GAAR AHAANEED OO BUUXA.-

Qod. 2aad

Cafiska gaar ahaaneed ee buuxa oo lagu tilmaamay qodobka koowaad ee sharcigaan, waxaa loola jeedaa CAFIS tirtiraaya eedii iyo dembiyadii loo haystay nooc kasta ha noqdeene qofka ka faa'iideysto sharcigan oo uu ka galay Dalka taariikhda u dhaqan galay ka hor sharcigan.

Qod. 3aad

Cafiska sharcigan ka hadlaayo waxaa xag u leh inuu ka faa'iideysto qofkii si ikhtiyaar ah Dalka ku soo noqdo muddo ku siman lix bilood laga bilaabo taariikhda sharcigan uu dhaqan galay.

Qod. 4aadd

CAFIS sharcigan uu tilmaamaayo ma saamaxaayo xaaladaha soo socda:

b) Qofkii aan ku soo noqon Dalka muddada lagu tilmaamay qod. 3aad ee Sharcigan ilaa haddii uu la yimaado sabab iraadadiisa ka baxsan oo caddeyn la socota sida: jirro, eed loo haaystay, baasaboor la'aan iyo wixii la mid ah;

t) Cafiskan ka faaiideeysan maayo qofkii 30 maalmood ka dib laga bilaabo maalinta Sharcigan uu dhaqan galay dambi ka galo Qaranka Soomaaliyeed;

j) Ca fiskan ma saameeynaayo xiriir shaqo oo ka dhaxayn karo qofka ka faaiideeysto Cafiska sharcigan uu qoraayo iyo wixii la xiriira arrimo madani ah.

Qod. 5aad

Khilaaf kasta oo ka dhasha sharcigan ku dhaqankiisa ka dhaxeeya qofka soo gala iyo xafiisyada xeer ilaalinta waxaa go'aan ka gaaridiisa yeelanaaya Guddiga cadaaladda.

Qod. 6aad

Xafiiska Xeer-Ilaalinta ku shaqo leh Xaruntа iyo laamaha Gobolada ama Degmooyinka ee Jamhuuriyadda D. ee Socmaaliya, waxay u samaynayaan qofkii Cafiskan ka faa'iideysto meeleeyn dacwad iyo wixii la mid ah (arkiviazione).

Qod. 7aad

Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa 24 Maarso 1979.

Qod. 8aad

Sharcigan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdishu, 15 Maajo 1979

Jaalle MAXAMED SIYAAD BARRE

Madaxweynaha J.D.S.

MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR
GUDCOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY : dacwadda kor ku qoran;
MARKUU ARKAY : waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Langiga;
HADDUU ARKAY : qod. 69 D.L. 9/9/65, N.2; lumidda Buug Kayd lam. yahay 7117 kuna qoran tahay lacag dhan Sh.So. 6.155/— Bangiga Ganacsiga iyo Kaydno gacanta laga saaro Dhexe.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusbooneysiiyo Buug Keyd ka dib markii ay ka soo wareegto 30/= maalmood maalinta dekeretada lagu shaaciyo Faafinta rasmiga ah ee dawldda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Buugga cusub e la sameyn dooka Soomaaliyeed Laanta Muraayad Xalane Maxamed ama gof isla asaga ka sita wakaalad sharci ah, ayadoo la sugaayo muddo 30 maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay:-
Muqdisho, 4/3/79.

GUDDOOMI. MAXKAMADDA GOBOL. BENAADIR
W.S. Dr. CABDULLAAAHI MAXAMED MAAX

L. 374

MAXKAMADDA GOBOLKA J/DHEXE

Jeeylaani Sheekh Yaasiin waxaa uu hor yimid Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka J/Dhexe asaga oo ah nin heysto Jeegagga Wareega Lr. Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Baraawe 696184, kuna qoran Shs. 1.370 Lr. 696196 kuna qoran Shs.So. 2.900/= Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Jeegga Wareegga Lr. 693456 kuna qoran Shs.So. 1.500/= isugeeynta guud ee lacagta Shs. 5.770/= (Shan kun todoba boqol iyo todobaatan), wuxuu itusay warqaddii Maamulayaasha labada Bangi ee sare ku xusan laamahooda Jilib iyo Baraawe.

Jeegagaasi kor ku xusan waxaa cadaatay in laga xaday Ninka ah dacwoodaha ee kor ku qoran.

S/D Waxaan halkan ku bixinayaa amar anigoo cuskanaya qod? 27 ee Dikareeto Lamb. 2 ee Setember 1965 in labada Bangi ee sare ku tilmaaman in ay baa-biyaan Jeegagga wareega ee l- 693456: 696184, 696196, waxaa kakloo amrayaa (a) in lagu qoro Faafinta Rasmiga ah (b) Lacagta ah Shs. 5.770/= (shan kun todoba boqol iyo todobaatan) ay u celiso arjilaha 30 casho dabadeed kadib markii lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda

Ka soo baxay gacanteeyda Shabadda Maxkamadda maanta Maarso 20. 3. 1979

Dr. Maxamuud Xasan Mina
Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka J. Dheexe

L. 375

MAXKAMADDA GOBOLKA DEGMADA BERBERA

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Axmed Muuse Faarax, oo degan Degmada Berbeera, taariikhdiisuna ahayd 11.2.79 iyo xaashida Bangiga Ganacsiga Laanta Degmada Berberra ee la qoray 15.2.79.

MARKAAN ARKAY: Qod 69. L. 9. 9. 65 L. 2 Waxaa cadaatay in Buugga lamb. yahay 2484/7 uu lumay taariikhdu markay ahayd 9. 2.79 kuna qornayd lacag dhan ShS. 10.078.00 oo Bangiga Ganacsiga Degmada Berbeera.

WAXAAN AMRAY

In loo cusbooneysiiyo mar kale Buugga kor ku xusan Muddo 30 cisho ah kaddib laga bilaabo Markii lagu dhigo Faafinta Rasmiga ah haddaan la hayn qof sheegta waa in gacanta laga saaro ninka magaciisu kor ku xusan yahay ama qof sita awood sharci ah 30ka berina waa in la sugaa.

Berbera 14.3.79

SHAWQI CILMI CALI

GUDDOMIYAHA MAX. GOBOLKA DEGMADA BERBERA

L. 376

MAXKAMADDA GOBOLKA DEGMADA BERBEERA

MARKAAN ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Maxamed Cumar Cali oo degan Degmada Berbera,, taariikhduna ahayd 11.2.79 iyo xaashida Bangiga Ganacsiga Laanta Degmada Berbeera ee la qoray 15.2.79

MARKAAN ARKAY; Qod. 69 L. 9. 9. 65 2 Waxaa caddaatay in Jeegga lamb. yahay 130047 uu lumay taariikhdu markay ahayd 10.2.79 kuna qornayd lacag dhan 50.000/= oo Bangiga Ganacsiga Degmada Berbeera.

WAXAAN AMRAY

In loo cusbooneeysiiyo mar kale Buugga kor ku xusan Muddo 30 cisho ah kaddib laga bilaabo markii lagu dhigo Faafinta Rasmiga ah haddaan la hayn qof sheegta waa in gacanta laga saaro ninka magaciisu kor ku xusan yahay ama qof ka sita awood sharci ah 30ka berina waa in la sugaa.

Berbera 14.3.79

SHAWQI CILMI CALI

GUDOOMIYAHA MAX. GOBOLKA DEGMADA BERBERA

L. 377

MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR

HADDUU Akhriyey dacwadda kor ku qoran;

HADDUU Hubsaday in JEEG WAREEGA dhumay oo lamabkiisu ahaa 151835 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed laanta kuna qornayd lacag Sh. So. 25.000/ uu iska lahaa Cumar Sheekh Axmed sida ku cad warqada lamb. 004703 taariikh 21.4.79 oo bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed laanta Dhexe.

HADII UU ARKAY: qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9.9.65

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (ammartamento) (Jeegga wareega) ee lambar. 151835 oo ku qoran magaca Cumar Sheekh Axmed ayna ku jirto Shs So. 25.000/=.

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Dhexe uu bedelo Cumar Sheekh Axmed (Jeegga wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kaddib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, maalinta go'aankan laguna daabaco Faafnita rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Demoqraadiga Soomaaliya, haddii inta ka horeysa aan is-hortaag laga keenin.

Muqdisho 23.4.79

GUDOOMIYAHA MAX. GOBOLKA BENAADIR
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 378

MAXKAMADDA G. HARGEYSA
XEER L. 4 1979
GARSOORUHU,

Haddii uu arkay Dacwad kor ku xusan.

Markuu arkay waxay ku saabsan tahay iyo ogeeysiinta Bankiga.

Haduu arkay Qodobka 669 D. L. 9.9.65 N.2 iyo Lumid Jeegga Wareega Lr. 151602 iyo Jeeg Wr. Lamb. 151603 kuna qoran midkiiba So. Shs 50.000/00 kuna qoran magaca Cali Ducaale Faarax.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusbooneysiiyo Jeeggaga Wareegga Lr. 151602 iyo 151603 ka dib markii ay ka soo wareegto 15 maalmood Maalinta dekeretada lagu sharciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LA Codsanayaa

In Jeeggaga Lr. 151602 iyo 151603 cusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro Cali Ducaale Faarax ama qof isla asaga ka sita Wakaalad Sharci ah ayadoo la sugaayo 15ka Maalmood ee aan kor ku soo sheegay.

Hargeysa 28.3.79

GUDOOMIYAHA MAX GOBOLKA HARGEEYSA
Yuusuf Xaaji Cabdi

L. 379